
duubabka fibarka oo kahortagaaya nabaad guurka ciida

ismaamulka san diego

# kahortag oo xakamee nabaad guurka ciida


dhoobada ayaa difaacaysa ciida banaanka usoo baxda

Nabaad guurka ciida ayaa ku imaan kara sababo badan, laakiin wuxuu badanaa saameeyaa mulkiileyaasha guryaha kadib dhacdooyinka sida roobka. Jaayga ama qaruuraxa ka yimaada ciida biyaha soo raacda ee gasha nidaamyadeena biyaha daadka qabta ayaa dhibaato u keena tuubooyinkeena biyaha ayagoo galaaya kanaalada kadibna xanibaaya iftiinka qoraxda ee ay u baahan yihiin nooleyaashu si ay u noolaadaan. Inta badan dadka deegaanka ayaa walaac ka qaba nadiifinta marinnadeena biyaha.

**Xaqiiqdii, xog aruurino laga sameeyay Ismaamulka San Diego ayaa muujinaaya in ka badan 50% dadka deegaanku ay aaminsan yihiin in wasaqda gasha ceebaheena, harooyinka, iyo balida ay si toos ah u saamayso ayaga iyo qoysaskooda.**


**! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, wabiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda, ayna ku jiraan jaayga ka yimaada ciida biyuhu qaadaan, ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo ogol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.**

Barnaamijka Difaaca Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego ayaa ka taageeraaya dadka deegaanka dedaaladooda si looga hortago wasaqda biyaha asagoo siinaaya tilmaamahaan muhiimka ah ee kahortaga waxyeelo ku dhacda gurigaaga kana timaada nabaad guurka ciida ee biyaha iyo kahortaga in jaaygu galo nidaamka biyo mareenka.

## kahortaga

Qaabka ugu fiican ee jaayga looga ilaaliyo inuusan waxyeelayn guryaha uusana u gelin kanaalada biyaha waa in laga hor istaago in sidaan dhacdo ayadoo la adeegsanaayo waxa loogu yeero Farsamooyinka Ugu fiican ee Maaraynka (BMP-yada). Meelo gaar ah oo kamid ah gurigaaga ayaa u nuglaan kara daadka in ka badan meelaha kale. Adeegso Sawirka Kahortaga Nabaad Guurka ciida si uu kaaga caawiyo go'aaminta aagaga aag isha ku haynayso iyo BMP-yada ayaad degsanayso si aad uga hortagto nabaad guurka ciida.

SAWIRKA 1 *Kahotaga Nabaad Guurka Ciida*




*La tasho khabiirka taagaga dhulka si uu kaaga caawiyo taagaga ka badan 50%.

## xakamee

Geedaha sida fiican loo beeray badanaa ma go'aan. Haddii aad dagan tahay meel nabaad guurka ciida iyo daadadku saamaynayaan hadda, adeegso tilmaamaha ku qoran bogga xiga si aad si ku meel gaar ah uga hortagto waxyeelo dheeraad ah aadna u xakamayso nabaad guurka ciida adoo dejinaaya xalalka waara, sida geedo beerista.

sii socota > > >

### Jawaannada ciida


***Ujeedada:*** Waxay muddo kooban abuuraysaa xakabad ka ilaalinaaya biyaha iyo ciida daadka inay soo galaan guriga iyo wadooyinka.

***Meesha loo adeegsado:*** Waxaa la dhigaa geesaha dhismaha, si looga leexsho ciida iyo biyaha daadka dhismeyaasha, si loogu duwo marinka u dhexeeya dhismeyaasha, loogana celiyo biyaha inay qaadaan ciida kore.


***Sida loo adeegsado:*** Jawaannada ciida waa in si saf dheer ah loo dhigaa ayadoon dhexdeedo meel laga banayn (arag sawirka 2 aad). Ku dhaji jawaanka meesha, sanka iskugu qabo, oo xir duleel kasta kahor adoon bilaabin lakabka xiga. Isdul saar jawaannada ciida 2 ilaa 3 lakab oo joog ah ama adeegso jooga saddex xagalka ah haddii joog dheeraad ah loo baahan yahay. Si aad u aragto tusaaleyaasha jawaannada ciida oo si sax ah la isku dulsaaray, booqo https://youtu.be/Tbr9QIrutZ4.

***Ogoow:*** Jawaannada ciida waa ina ala saarin meelaha tuurka ah ama salka dhismaha. Ka taxadar meesha biyaha loo leexinaayo maadaama ay sharci daro tahay inaad biyaha u leexiso meel saamayn xun ku reebaysa deriskaaga. Si aad u hesho meesha aad ka helayso jawaannada ciida oo bilaash ah deegaankaaga, booqo www.readysandiego.org/flooding/.

**SAWIRKA 2** *Taakooyinka Jawaannka ciida ee Dhismaha A*




**SAWIRKA 3** *Adeegsiga Duubabka Fibarka (Straw Wattles)*




### Duubka Fibarka (Straw Wattles)

***Ujeedada:*** Waxay yareeyaan xawaaraha biyuhu ku socdaan meel waxaynka celiyaan jaayga.

***Meesha loo adeegsado:*** Geesaha cirifyada taaga, meelaha u dhow dusha sare iyo salka taagaga, aagaga meelaha banaan ee dabku saameeyay.

***Sida loo adeegsado:*** Duubabka fibarka waa in loo sameeyo dhufayn meeshana lagula dhejiyaa rastooyinka alwaaxa ah. Arag sawirka 3 aad.

***Ogoow:*** Duubabka fibarka waa in la dayactiraa ama la badelaa haddii ay dilaacaan ama jeexmaan. Jaayga gaaraaya 3/4 kamid ah jooga duubka waa in la guraa. Duubabka ibarka ayaa laga heli karaa inta badan dukaannada dayactirka guryaha.

### Dhoobada


***Ujeedada:*** Waxay si ku meel gaar ah uga difaacdaa ciida kore ee dhulka in daadka roobka iyo dabayshu qaadaan.

***Meesha loo adeegsado:*** Meelaha ciida dusha sare ee dhulka, ayadoo ku xiran taaga. Arag sawirka 4 si aad u hesho faahfaahin.

***Sida loo adeegsado:*** Xash ama jeexyada alwaaxa waa in lagu daadshaa dusha ciida ilaa jooga dhawr inji. Ku dabool jeexyada cadadka alwaaxa ilaa 2 inji gudaha ciida ayaa sisdoo kale loo adeegsan karaa meelaha taaga ah iyo haddii xaalada ciidu saamaxayso.

***Ogoow:*** Dhoobada waa in lala adeegsadaa qaababka kale sida duubabka fibarka si difaac buuxa loo helo. Waa muhiim in dhoobada si sax ah loogu shubo meesha si looga hortago inaysan ka tagin gurigaaga, taasoo qasaarinaysa dhoobada subayna karka marinnada biyaha.

**SAWIRKA 4** *Sida Loo Sameeyo Dhoobada*




***Si aad u hesho xog ku saabsan jawaannada qaruuraxa iyo BMP-yada kale, akhri buugga xogta ee BMP-yada Nabaar Guurka Ciida iyo Jaayga.***

***Si aad u hesho Xog Dheeri ah***

**1-888-846-0800**

**watersheds@sdcounty.ca.gov | www.sandiegocounty.gov/stormwater**

> > > waad ku mahadsan tahay inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.